

Ma awoodid miyaa inaad tagto goob codbixin?



vote.nz

Codee Doorashada Guud ee 2026

Si aad u codeyso Doorashada Guud ee 2026, waa inaad isdiwaangelisaa ugu dambayn **saqda dhexe, Axadda, 25-ta Oktoobar.**

Waxaad ka codayn kartaa Doorashada Guud ee 2026 laga bilaabo Isniinta, 26-da Oktoobar, ilaa 7 galabnimo maalinta doorashada oo ku beegan Sabtida, 7-da Nofeembar. Ka firi **vote.nz** waqtiyada ay shaqaynayaan iyo goobaha ay ku yaalaan meelaha laga codeeyo kahor intaadan aadin.

Haddii aadan awoodin inaad tagto goobta codbixinta, weli waad codayn kartaa haddii aad isdiwaangeliso ugu dambayn **saqda dhexe, Axadda 25-ta Oktoobar.**



Complete this form on both sides to authorise someone to collect voting papers on your behalf

Voter's details. Please print clearly.

My first name(s) are:

My last name is:

My contact phone number is:

OFFICIAL USE ONLY:
Index reference

Address where I am enrolled to vote:

✓ Tick the electoral roll you believe you are enrolled on:

☐

General roll

☐

Māori roll

Macluumaadka ku saabsan goorta iyo goobta laga codeynayo waxaa laga heli karaa barta [vote.nz](https://www.vote.nz) ama ayadoo la wacayo 0800 36 76 56.

Waxaad fursad u haysataa inaad codbixintaada ka dhiibato meelo kala duwan oo codbixineed laga bilaabo Isniinta Oktoobar 26-deeda ilaa 7 galabnimo ee maalinta doorashada, Sabtida, Nofeembar 7-deeda.

Maalmaha iyo waqtiyada ay goobaha codbixinta hore u furan yihiin way kala duwan yihiin. Ka fiiri waqtiyada codbixinta barta [vote.nz](https://www.vote.nz) kahor intaadan bixin.

Maalinta doorashada, Sabtida Nofeembar 7-deeda, goobaha cod bixinta waxay furnaan doonaan 9 subaxnimo ilaa 7 galabnimo.

Miyaad shaqaynaysaa maalinta doorashada?

Waxaa sharci ahaan lagu oggolaayaa yahay in fasax lagaa siiyo shaqada si aad u soo codeyso maalinta codbixinta. Waxaad sidoo kale xilli hore ka codeyn kartaa goob kasta oo codbixineed laga bilaabo Isniinta Oktoobar 26-deeda.

Wali waa codeyn kartaa haddii aad ku jirtid guri daryeel

Haddii aad ku jirto guri daryeel, uma baahnid inaad nala soo xidhiidho. Maareeyaha Doorashada Deegaankaaga ayaa la xidhiidhi doona qofka gacanta ku hayo gurigaaga si uu u qabanqaabiyo adeegyada codbixinta.

Wali waad codeyn kartaa haddii aad isbitaal kujirtid

Haddii aadan tagi karin goobta codbixinta maadaama aad ku jirto isbitaal, laga bilaabo Isniinta Oktoobar 26-deeda saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah ayaa kuu keeni kara warqadahaaga codbixinta.

Haddii lagu qorsheeyay inaad gasho isbitaal ka hor maalinta doorashada, waxa fiican inaad xilli hore codayso haddii aad awoodo, laga bilaabo Isniinta Oktoobar 26-deeda. Naga soo wac **0800 36 76 56** wixii macluumaad ah ee dheeraad ah.

Waxa aad samayn karto haddii aadan tagi karin goobta codbixinta

Waxaan siinaa aadeegyada codbixinta dadka aan tagi karin goobta codbixinta. Haddii aadan awoodin inaad shaqsi ahaan u codeyso, tusaale ahaan, xanuun ama naafanimi awgeed, waxaad qof ka codsan kartaa inuu kuu keeno warqadahaaga codbixinta ama waxaad codsan kartaa in lagu soo diro waraaqaha codbixinta.

Qof ka codso inuu kuu soo qaado warqadahaaga codbixinta

Haddii aadan awoodin inaad tagto goob codbixineed, buuxi oo saxiix foomka ku jira lifaaqa kadibna qof ka codso inuu kuu geeyo goobta codbixinta. Kadib waxay kuu soo celin doonaan warqadahaaga codbixinta si aad u buuxiso.

Haddii aanu jirin qof kuu soo qaadi kara waraaqahaaga codbixinta adiga beddelkaada, waxa laga yaabaa in aanu awoodno inaan kuu keeno.

La xiriir Maareeyaha Doorashada Deegaankaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad lagala xiriiro barta [vote.nz](https://www.vote.nz) ama naga soo wac lambarka **0800 36 76 56**.

Sida loo soo celiyo warqadahaaga codbixinta

Qof waydiiso in warqadahaagii codbixinta ee la dhammaystiray uu dib ugu celiyo goobta codbixinta ka hor 7 galabnimo, Sabtida Nofeembar 7-deeda.

Haddii aad haysato xirmada boosto-qaadaha ee soo celinta, waxaad raacdaa tilmaamaha ku qoran xirmada si aad u qabanqaabiso qaadis boosto-qaade, haddii aadan haysan xirmada naga soo wac **0800 36 76 56** haddii aadu baahato kaalmo.



Macluumaad dheeraad ah ayaa laga helayaa:

- Booqo [vote.nz](https://www.vote.nz)
- Wac **0800 36 76 56**



Give my voting papers to the person I have authorised

The name of the person I have authorised to collect and deliver my voting papers to me is:

Note: this application must be signed for it to be valid.



☐ I have been authorised to collect and deliver voting papers to the voter named on this form.

Signature of authorised person Date

Signature of voter Date